


EDR145-SO

Waamaxay duleelinta caloosha iyadoo la adeegsanayo endhokob maqaarka laga dusinayo (PEG)?

Gelinta tubbada caloosha iyadoo la adeegsanayo endhokob maqaarka laga dusinayo waa sanco tuubo jilicsan oo midda quudinta ah (oo sida caadiga ah loo yaqaano PEG) lagu gelinayo gidaarka uur ku jirta iyo gudaha caloosha. Waxaa lagu gelin karaa qalliin ama hagidda raajada. Qalliin kale ayaa caadi ahaan loo baahdaa 8 isbuuc kaddib si tuubooyinkan loogu beddelo tuubo gaaban. Tubbada gaaban ee caloosha waa nooc ka mid ah tubbada caloosha oo la gelinayo caloosha iyadoo la dhex marinayo gidaarka uur ku jirta, wuxuuna joogayaa meel u dhaw caloosha guudkeeda sare. Wuu yaryahay aadna uma muuqdo.




MIC* PEG

This information is for educational purposes only. It is not intended to replace the advice of your health care providers. If you have any questions, talk with your doctor or others on your health care team.

If you are a Gillette patient with urgent questions or concerns, please contact Telehealth Nursing at 651-229-3890.

Quudinta iyo Daawo Siinta


- Kala soco takhtarkaada tilmaamaha ku saabsan tuubo ku quudinta iyo daawo siinta.
- KELIYA isticmaal cuntooyinka gaarka ah ee loogu tala galay in lagu isticmaalo tuubada caloosha G/GJ tube (Haddii takhtarkaada sikale aydaan kawada hadlin).
- Biyo ku falaash tuubada ugu yaraan maalintii labo jeer ama raac tilmaamaha cunto yaqaanka haddii lagu siiyey.
- Biyo ku falaash tuubada kahor iyo kaddib marka aad quudiso ama aad daawo siiso.
- Fiiro gaar ah: sida badan quudinta tuubada mindhiciirka (J port) waa mid loo siiyo hab ay ku soconeyso quudinta muddo iyadoo la isticmaalayo bam is wadaya, caadi ahaan 12 ilaa 24 saac iyadoo laga qiyaas qaadanayo xaaladdaada gaarka ah.



Low Profile G-J Tube

This information is for educational purposes only. It is not intended to replace the advice of your health care providers. If you have any questions, talk with your doctor or others on your health care team.

If you are a Gillette patient with urgent questions or concerns, please contact Telehealth Nursing at 651-229-3890.



Low Profile G-Tube

La-Socodka

- Waxaan ku talineynaa in la beddelo tubbada quudinta 3 dii bilood kasta mar. Tubbooyinka GJ had iyo jeer waxaa lagu beddelaa qeybta raajooyinka. Fadlan la xiriir qeybta raajooyinka si aad u qabsato ballanta lagu beddelayo tubbada GJ. Waxaad u baahan doontaa inaad ka qabsato ballan qeybta raajooyinka ama takhtar tababaran 8-12 usbuuc kadib gelinta si loogu badalo PEG-ga tubbada caloosha oo gaaban (Low profile G-Tube). Intaas ka dib, tubbada caloosha ee gaaban beddelisteeda waxaa lagu sameyn karaa guriga 2-3 bilood kasta mar.
- Tubbooyinka G / GJ lagama saari karo ilaa 6 toddobaad ay kasoo wareegato ka dib gelinta tuubada.
- T-fasteners / badhannada (cayngariga) waa in laga saaro 7-10 maalmood ka dib gelinta tubbada. Tani waxaa laga yaabaa in la sameeyey intii aad cisbitaalka weli joogtay. Waxaa kale oo lagu sameyn karaa kiliinigga bukaan-socodka ama xarun daryeel. Fadlan la xiriir qeybta Qalliinka /

This information is for educational purposes only. It is not intended to replace the advice of your health care providers. If you have any questions, talk with your doctor or others on your health care team.

If you are a Gillette patient with urgent questions or concerns, please contact Telehealth Nursing at 651-229-3890.

Raajooyinka wixii su'aalo ah ama walaac ah ee ku saabsan T-fasteners (badhanada iyo caygariga) ama tilmaamaha sida looga saarayo.

Goorma ayaan arkaa dhakhtarkayga?

Fadlan la xiriir dhakhtarkaada haddii aad dareento mid ka mid ah kuwa soo socda:

- Qandho ka sareysa 101°F (38.3C).
- Malax (Dheecaan jaale ama caagaar ah ama ur leh) oo ka soo baxaya tubbada halka ay kasoo baxdo.
- Xanuun caloosha ah oo aad u weyn ama ka sii daraya
- Maqaarka oo kulul marka la taabto ama si weyn u gaduutay halka tubbada ka soo baxdo.
- Dhiigbax halka tuubada ka soo baxeyso.
- Tubbada oo ka soo dhacda ama la dareemayo inay booskeeda ka baxday.
- Tubbada oo aadan awoodin inaad biyo ku falaashto.
- Daadin aad u badan tubbada hareereheeda (quudinta, daawooyinka, ama dheecaan).
- Xanuun ba'an oo ka jira halka tubbada kasoo baxdo.

****FIIRO GAAR AH:** Fadlan raac tilmaamaha gaarka ah ee kooxaha Qalliinka / Raajada, maadaama kuwan loogu talagalay in ay noqdaan tilmaamo guud ee daryeelka ka dib gelinta tubbada.